SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE TALLAALKA COVID-19

La cusbooneysiiyay Luulyo 9, 2024

COVID-19 wali dadka wuxuu u keenaa jiro, u horseeda in isbitaal la dhigo ama inay dhintaan— sidaa darteed, waa wax muhiim ah in qof walba ee qaadan kara waa inay qaataan.

Haddii aan horey u qaatay tallaalka, miyaan wali u baahnahay inaan markale tallaalka qaato?

Haa, Qof walba ee ah da'aha 6 bilood iyo ka weyn waa inay qaataan tallaalka 2024/2025 ee COVID-19 ilaa iyo inta laga joogo laba bilood tallaalkoodii ugu dambeeyay ee COVID-19. Haddii aadan hubin, weydii dhakhtarkaaga ama ka hubi websaydhka CDC wixii macluumaad dheeraad ah.

Waa maxay saameynta ka imaan kara tallaalka 2024/2025 ee COVID-19?

Mid la mid ah kuwa tallaalada COVID-19 ee kale, saameynta ugu badan waxaa ka mid ahaan kara:

- Daal
- Madax-xanuun
- Muruq xanuun
- Xanuun, guduudasho, iyo barar ku yimaado goobta la duray

Miyaan qaadan karaa tallaalka hargabka iyo tallaalka COVID-19 isku wakhti?

Waad qaadan kartaa oo waa inaad qaadataa wixii tallaalo ah ee kale ee wakthigooda la joogo isla booqashada.

Maxaan ugu baahanahay tallaalka kale ee COVID-19?

Fayraska COVID-19 wuu isbeddelay ilaa iyo inta la joogo tallaalkii ugu horeeyey ee COVID-19. La socoshada tallaalada COVID-19 waa habka ugu wanaagsan ee looga fogaado isbitaal dhigista, dhimashada, iyo xaaladaha kale ee caafimaadeed ee mudada dheer ee uu keeno caabuqa COVID-19.

Yey tahay inay qaataan tallaalka COVID-19?

Qof walba ee da'diisu tahay 6 bilood iyo ka weyn ayaa qaadan kara tallaalka. Tirada qiyaasaha tallaalka ee uu qofku u baahan yahay way kala duwan yihiin iyadoo ku xiran da'da iyo inta qiyaas ee horey u qaateen.



IMMUNIZE WISCONSIN

BOOQO WEBSAYDHKEENA
ImmunizeWI.org

Macluumaadkan waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo Illinois Chapter, Akadeemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta (American Academy of Pediatrics) iyadoo la adeegsanayo maalgelin uu suurtagaliyey Xafiiska Xakamaynta Cudurrada (Office of Disease Control), iyada oo loo sii marayo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Illinois) Illinois Department of Public Health.)

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO EE TALLAALKA COVID-19

La cusbooneysiiyay Luulyo 9, 2024



Xagee baa ka qaadan karaa tallaalka COVID-19?

Goobta ugu wanaagsan si aad u hubiso waa xafiiska dhakhtarkaaga! Sidoo kale waxaad ka hubin kartaa farmashiyahaaga maxaliga ama booqo **vaccines.gov** si aad u eegto goobaha tallaalka lagu bixiyo ee kuu dhawo.

Miyaan dooran karaa tallaalka aan qaadanayo?

Dadka badan kood waxay kala dooran karaan Moderna, Pfizer, iyo Novavax (Novavax waxaa kaliya heli kara kuwa da'doodu tahay 12 sano jir iyo ka weyn). Iyadoo sidaa tahay, waa inaad qaadataa wixii tallaal ah ee aad heli kartid!

Waa imisa qiimaha tallaalada COVID-19?

Nasiib darro, tallaalada COVID-19 ee la cusbooneysiiyay uma aha lacag la'aan dadka oo dhan dib dambe. Waa kuwan fikraddo ah imisa ayaa laga yaabaa inuu qiimaha tallaalka COVID-19 idinku yahay adiga iyo qoyskaagaba:

Tallaalka Carruuurta

Haddii uu ilmahaaga uu ka diwaangashan yahay ama u qalmo barnaamijka Tallaalada Carruurta (Vaccines for Children (VFC)), waxay awoodi doonaan inay ku qaataan tallaaladooda lacag la'aan.

Daboolida Caymiska ee Tallaalada COVID-19 Wuxuu Lamid Yahay Tallaalada Kale

Dadka haysta caymiska gaarka ah ama gobolka/federaalka, waxay u badan tahay in qorshahaagu uu dabooli doono qiimaha tallaalka COVID-19. Waxaa laga yaabaa inaad bixiso qiimo yar, lamid ah inta aad ku bixiso tallaalada kale. Mar walba waxaad ka hubin kartaa bixiyahaaga caymiska kahor intaadan tallaalka qaadan.

IMMUNIZE WISCONSIN

BOOQO WEBSAYDHKEENA
ImmunizeWI.org

Macluumaadkan waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo Illinois Chapter, Akadeemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta (American Academy of Pediatrics) iyadoo la adeegsanayo maalgelin uu suurtagaliyey Xafiiska Xakamaynta Cudurrada (Office of Disease Control), iyada oo loo sii marayo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Illinois) Illinois Department of Public Health.)